


Fahmidda beerka la soo jarayo



Fahmidda beerka la soo jarayo

Beerka la soo jarayo waa hawl uu dhakhtarka uu ku isticmaalayo cirbad khaas ah taaaso soo jaraysa xinjirta beerka si loo eego calaamadaha dhibaata soo gaartay. Beerka la soo jaray waxa uu adiga iyo dhakhtarka ka caawinayaa si loogaa doonayo wax dheeraad ah ee ku saabsan caafimaadka beerkaaga.

Tan waa muhiim haddii aad adiga qabtid cagaarshowga C ama cudur kale ee beerka ah iyo in aad doonaysid in aad iska daawaysid. Xinjirta beerka laga soo jarayo waxa kale oo ay wax ka caawin karta marka dhakhtarkaaga aanu hubin waxa dhibaataada u keenaya beerkaaga. Laakiin soo jaridda xinjirta ma aha wax qof kasta uu u baahanyahay.

Hawlgalka lagu jarayo--xinjirta beerka

Jaridda xinjirta beerka waa qaab daaweyn ah oo isbitaalka ka dhacda. Waa inaad dhabar dhabar u seexatid inta ay hawshu socoto. Marka hore, dhakhtarka aya helaya meel bannaan oo u dhaxeeya feerahaaga dhinaca midigta ku yaalla oo ah halka laga soo jarayo cad beer ah oo si nabdoon u dhacaya.

Kaddibna dhakhtarka ayaa nadiifinaya maqaarka ka korreya meeshaan oo cirbad kugu duraya, meeshana la kabaabyeeyo. Kaddib marka meesha la kababeeyo, dhakhtarka ayaa cirbadda ku soo jaraya beerka cad yar ee xinjirta ah. Qaybatan hawlgalka si dhaqsa leh ayuu u dhacayaa.

Dadka badankooda ee laga soo jaro xinjirta beerka waxa ay yiraahdan waxaa kaasoo gaaraya xanuun yar. Xanuun yar sida tan qaniinyada shinnida ayuu qofka dareemaya marka uu dhakhtarka cirbadda lagugu kabaabyeynayo uu kugu durayo. Dad badan sidoo kale waxa ay dareemaaan cadaadis marka lagu durayo cirbadda oo xinjirta la soo goynaypp. Dadka qaakood waxa kaloo ay sheegeen in ay dareemayaan cadaadis ka soo gaara garabkooda.

Soo jaridda xinjirta beerka ka bacdi

Kaddib markii xinjirta lagaa so jaro, dhakhtarkaaga waxa uu ku weydiin doonaa in aad hal dhinac isku rogtid oo aad sidaa ahaatid ugu yaraan 1 illaa 2 saacadood.



HEPATITIS C
SUPPORT PROJECT

frequently asked

About Hepatitis C

Tan waxa ay cadaadis saaraysaa meelaha xinjirta laga soo jaray, si markaasi uusan dhiig iyo dhibaatooyin kale ka imaanin marka ay dhacdo in aad si dhaqsa u soo kacdid. Dabadeed, dhakhtarkaaga dhiig ayuu kaa qaadayaa si loo hubiyo in dhiig aanu kaa socon. Kaddib, waxaa lagu sheegi doona in aad gurigaaga aadid kartid. Raac talooyinka dhakhtarkaaga ee ah in aad kor u qaadin wax culus ilaa 2 usbuuc, si markaasi uu jirkaaga u helo muddo ku filan oo u ku raysto.

Halista ka imaan karta xinjirta la jarayo

Guud ahaan xinjirta beerka ee la jarayo waa mid nabadoon. Laakiin sida hawlgal kasta ee caafimaadka waxaa ka imaan kara halis.

• Hep C FAQ sheet •

A publication of the Hepatitis C Support Project

Executive Director

Editor-in-Chief, HCSP Publications
Alan Franciscus

Author

Alan Franciscus

Design

Leslie Hoex

Production

C.D. Mazoff, PhD

Contact information:

Hepatitis C Support Project
PO Box 427037
San Francisco, CA 94142-7037
alanfranciscus@hcvadvocate.org

The information in this fact sheet is designed to help you understand and manage HCV and is not intended as medical advice. All persons with HCV should consult a medical practitioner for diagnosis and treatment of HCV.

This information is provided by the Hepatitis C Support Project, a nonprofit organization for HCV education, support and advocacy, and the Minnesota Department of Health.

Reprint permission is granted and encouraged with credit to the Hepatitis C Support Project.

©Marchy 2008 Hepatitis C Support Project

Halisayadaan waxaa kamid ah:

- meesha xinjirta laga jaray oo ku xanuunta
- beerka oo dhiig ka yimaado
- duridda xibna kale ee jirka, haddi ay wax khaldamaan marka cirbadda lagugu durayo in u
- u qofka dhinto mar dhif ah (1 kiis 10,000 kiis)

Xinjir lagaama jarayo haddii aad qaadatay asbiriin ama daawo kale oo dhigga khafiifisa usbuuca ka horreya hawlgalka. Lama oggola in aad daawoyinkan qaadatid usbuuca ka dambeeya qalliinkan xitaa. Iska hubso in aad dhakhtarkaag aad u sheegtid dhammaan daawoyink aad qaadatid oo idil ama aad qaadan doontid. Xinjirta lagaama jarayo haddii uu dhakhtarkaaga ku taliyo in cudurka beerka uu ku faafo heer ah in dhiiggaagu aanu u xinjiroobin si caadi ah.

This HCSP FAQ is also available in the following foreign languages:

- Chinese
- Hmong
- Somali
- Spanish
- Vietnamese

<http://www.hcvadvocate.org/hepatitis/international.asp>